Ilmo korinta Khaaska ah ee gudaha Hackney

Hackney

Ilmo korinta Khaaska ah ee gudaha Hackney

Somali

Qof kale miyaa ilmahaaga ama carruurtaada xannaaneeyo?

ama

Adiga miyaa xannaaneeyo ilmo uu qof kale dhalay?

Haddii jawaabtaada ku aaddan mid ka mid ah su'aalahan ay tahay haa markaa warqaddani waxay ku siin doontaa macluumaad muhiim ah.

Waxaa jiro sababo badan oo ilmaha lagu geyn karo goobaha ilmo korinta khaaska ah. Waxaa ka mid ah:

- Carruurta la nool qof qoyska saaxiib la ah iyadoo ay sabab u tahay rabsho ka dhex jirto qoyska dhexdiisa
- Carruur (mararka qaarkood waalid da'yar) oo deriska la nool
- Carruurta waalidkood laga yaabo in ay waxbartaan ama shaqeeyo saacado aan caadi aheyn
- Carruurta qaxootiga ama guri la'aanta ah
- Carruurta ay waalidkood dibadda jiraan
- Carruurta si aan sharci aheyn lagu keenay

Haddii ilmahaaga lagu koriyo meel khaas ah ama aad adigu daryeesho carruur dad kale dhaleen markaa sii akhri warqadda.

Waa maxay ilmo korinta khaaska ah?

Ilmo korinta khaaska ah waa howl gaar ah oo u dhexeyso waalid iyo daryeele. Marka ilmo da'diisu ka hooseyso 16 (ama 18 haddii uu cuuryaan yahay) uu daryeelo oo uu siiyo meel uu ku noolaado, qof weyn oo aan qaraabo u aheyn, 28 maalmood ama wax ka badan, waxaa la yiraahdaa ilmo korinta khaaska ah.

Qaraabo halkan waxaa loola jeedaa ayeeyo ama awooye, walaal wiil ah, walaal gabar ah, adeer ama eeddo. Waxay noqon karaan qaraabo dhameystiran ama nus ah waxaana xiriirku ku imaan karaa guur. Qaraabada waxaa kale oo ku jiro eeddo uu aabuhu qabo ama adeer hooyo qabo.

La noolaha hooyada ama aabaha ee aan guurka ku iman ma noqon karo qaraabo; sidoo kalana ma noqon karaan xubnaha qoyska ee fog sida eeddo fog, adeer fog, ilmo adeerta waalidka.

Waa maxay doorka Golaha?

Golaha Hackney waxaa ka saaran waajib sharcigu farayo in ay hubiyaan in carruurta iyo dadka dhalinyarada ah ee xaaladahan ku jiro ay helaan amni si wanaagsanna loo daryeelo. Sharciga Carruurta gudihiisa, waa in aad Golaha u sheegtaa haddii geleyso howlaha ilmo korinta khaaska ah.

Waalidiinta

Haddii qof kale uu hayo ama heyn doono ilmahaaga waa in aad:

- Hubisaa in goobtu ku haboon tahay ilmahaaga.

- La xiriir Hackney Adeegyada Carruurta (Children's Services) ugu yaraan lix todobaad ka hor inta aysan howshu bilaaban ama 48 saacadood gudahood marka howsha dedeg loo bilaabo.

Waxaad ka wici kartaa Kooxda Qiimeynta iyo Shaqada (Duty and Assessment Team) halkan 0208 356 5500 ama Kooxda Qiimeynta iyo Xulashada (Recruitment and Assessment Team) halkan 08000 730 418.

Maxay tahay in aad u sheegto daryeelaha?

Waa in aad hubisaa in qofka ilmaha xannaaneynayo uu helo macluumaadka ugu badan ee suurtogalka ah ee ku saabsan ilmaha. Tan waxaa ka mid ah macluumaadka ku saabsan caafimaadkooda,diiwaanada dugsiyada, waxyaalaha dhaqanka iyo diinta loogu baahan yahay, cunto kala doorashada, dookhooda, waxyaalaha ay jecel yihiin iyo waxyaalaha ay neceb yihiin.

Ma waxaad waayeysaa xuquuqda ilmahaaga?

Ma waayeysid wax xuquuq ah oo ilmahaaga quseeyo bacdamaa ilmahaaga loo heynayo si ku meelgaar ah. Weli waxaad heysataa mas'uuliyadda waalidnimada ee ilmahaaga waxaadna ka qaybqaadaneysaa dhammaan go'aamada quseeyo horuumarka iyo koritaanka ilmahaaga. Xiriir jooogto oo aad la yeelato ilmahaaga waa muhiim si aad gacan uga geysato in go'aamadan la gaaro.

Maxay Adeegyada Carruurta Hackney inoo qabanayaan aniga iyo ilmaheyga?

Hackney waxaa waajib ka saaran yahay in ay ogaadaan in daryeeluhu ku haboon yahay in uu daryeelo ilmahaaga. Waxaanu sameyn doonnaa booqasho joogto ah si aan u aragno ilmahaaga waxaana ka bixin doonnaa talo iyo taageero halkii ku haboon.

Ka waran haddii aanan ogaan karin waxa ilmaheygu qabo?

Haddii aad ka welwelsan tahay wax ku saabsan daryeelka ilmahaaga, ka labo labeyn, nala soo xiriir si aan ku caawino.

Waa dembi in aad usoo sheegi wayso Golaha howlahan oo kale.

Daryeelayaasha

Haddii aan doonayo in aan ilmo si khaas ah u koriyo, maxaa la iiga baahan yahay in aan sameeyo?

Waxaa lagaaga baahan yahay in aad la xiriirto Adeegyada Carruurta Hackney isla marka aad howsha bilowdo ama ugu yaraan lix todobaad ka hor inta uusan ilmuhu kuu iman. Haddii ay jirto xaalad degdeg ah Adeegyada Carruurta waa in lagu wargeliyaa 48 saacadood gudahood. Waxaad ka wici kartaa Kooxda Qiimeynta iyo Shaqada halkan 0208 356 5500 ama Kooxda Qiimeynta iyo Xulashada halkan 08000 730 418.

Macluumaad noocee ah ayaan u baahanahay in aan heysto?

Waa in aad hubisaa in waalidka ilmuhu ku siiyaan macluumaadka ugu badan ee suurtagalka ah ee ilmaha ku saabsan, oo ay ku jiraan caafimaadkooda, diiwaanada dugsiga, waxyaalaha diinta iyo dhaqanka loogu baahan yahay, kala doorashada cuntada, dookhooda iyo waxyaalaha ay jecel yihiin ama neceb yihiin. Tani waxay kaa caawin doontaa in aad fahamto ilmaha oo aad si wanaagsan u daryeesho isaga ama iyada.

Haddii aan u baahdo taageero ama talo inta aan ilmo korinta khaaska ah wado xagee baan u doontaa?

Waa in aad la xiriirtaa Adeegyada Carruurta Hackney wixii talo siin ah marxaladaha qaarkoodna adeegyo taageero ah ayaa laga yaabaa in aad heli karto.

Ma awoodi doonaa in aan dalbado Lacagaha Shac-Ceyrta?

Waxaa laga yaabaa in aad dalban karto credit-ka canshuurta/ama lacagaha shab-ceyrta sida Lacagta Ilmaha iyo Taageero Dakhli oo suurtagal ah ama Gunnada Shaqo Doonka, haddii aad qaadato Lacagta Ilmaha. Xafiiska Wakiilka Manfacyada degaankaaga ayaa talo ku siin karo.

Maxaan sameeyaa marka ilmaha laga saaro daryeelkeyga?

Waa in aad u sheegtaa Adeegyada Carruurta Hackney 48 saacadood gudahood marka ilmaha laga saaro daryeelkaaga. Waa in aad sheegtaa xattaa magaca iyo cinwaaka qofka daryeeli doono ilmaha mustaqbalka.

Waa dambi in aan la ogeysiin Golaha howlaha noocan ah.

Haddii aad jeclaan laheyd in aad ogaato in badan oo ku saabsan ilmo korinta khaaska ah la xiriir:-

- Kooxda Qiimeynta & Shaqada:
  Telefoon 0208 356 5500
- Kooxda Qiimeynta iyo Xulashada:
  Telefoon bilaash ah 08000 730 418

Xusuusin

Isticmaal bogagga in aad ku qorto macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan ilmaha aad xannaaneyso

Magaca ilmaha: _____

Magaca koowaad: _____

Magaca qoyska: _____

Taariikh Dhalasho: _____Da'da: _____

Taariikhda ilmuhu kuu yimid si uu kuula joogo: _____

Diinta: _____

Magaca dhaqtarka iyo cinwaanka:

_____

_____

_____

Dugsiga uu dhigto:

_____

Dookha ilmaha, waxa uu jelcel yahay iyo waxa uu neceb yahay

_____

_____

_____

_____

Macluumaadka waalidka

_____

_____

Magaca waalidka:

_____

_____

Cinwaan:

_____

_____

_____

Lambarka telefoonka: _____

Tusahan waxaa kale oo lagu helayaa luuqadaha soo socdo:

- Faransiis
- Turkish
- Bengaali

Haddii aad jeclaan laheyd in aad nuqul hesho, kala xiriir kooxda ilmo korinta 08000 730 418

Bu kılavuzun Türkçesini okumak istiyorsanız, 0800 0730 418 numaraya telefon edip Evlât Edinme Ekibi'ne (Fostering Team) başvurabilirsiniz. (Turkish)

Ce guide est également disponible en français. Si vous en désirez une copie, contactez l'équipe de Fostering au 08000 730 418. (French)

এই গাইড বা নির্দেশিকাটি বাংলাতেও পাওয়া যায়। যদি আপনার একটা কপির দরকার হয়, তাহলে 08000 730 418 নম্বরে ফস্টারিং টীমের সঙ্গে যোগাযোগ করুন। (Bengali)

INVESTORS IN PEOPLE

Hackney

Produced by Design & Communications • Hackney Council • March 2006 • PJ26182